


Waalidku sidoo kale wuu Tiriya

Ku caawinta ilmahaaga – metelaada iyo turjumaada garaafyada iyo jadwalada

Nolol maalmeedkeena waxaa naloogu yeerayaa inaan fahamno macluumaadka laynoogu soo gudbiyo garaafyada iyo jadwalada. Waxaan ku aragnaa macluumaadkan oo kale wargeysyada iyo waraaqaha yar yar ee macluumaadka, biilasha ama telefishinka. Garaafyada ayaa sahli kara in la keydiyo lana turjumo macluumaadka sidoo kale waxay naga caawiyaan inaan sameyno saadaalin sida saadaalinta hawada, heerarka dulsaarka iyo kharashaadka mustaqbalka ee isticmaalka korontada gurigeena. Carruurta waxay baran doonaan inay akhriyaan oo ay turjumaan garaafyada iyo jadwalada wakhtiga ay casharka xisaabta ah qaadanayaan iyo sidoo kale intay dhiganayaan sayniska, caafimaadka iyo casharada kale.

Sidee bay carruurta u bartaan inay sameeyaan oo ay turjumaan garaafyada iyo jadwalada?

Bilow ahaan carruurta waxay bartaan inay dhisaan garaafka iyagoo soo ururiyanaya macluumaadka jadwalka ku jira ka dibna ay isticmaalaan alaabta ama sawirada si ay u metelaan macluumaadkan garaaf ahaan. Nooc ahaan sannadaha hore, carruurta waxaa la weydiinayaa macalinkooda inay soo ururiyaan oo ay kaydiyaan macluumaad ku saabsan nafsadooda, sida xayawaanka ay korsadaan, ama degaankooda, sida midabka baabuurta yaal meelaha baabuurta la dhigto. Garaafyadii hore, hal sawir ayaa u taagnaan jirey hal shey.



Ka dib, carruurta waxay baran doonaan inay isticmaalaan calaamadaha wax lagu tiriyo ee (tusaale $\frac{1}{2}$, III) si ay u metelaan natiijada daraasada. Waxaa laga yaabaa in la weydiyo inay isticmaalaan calaamadaha wax lagu tiriyo si ay u keydiyaan tirada baabuurta dugsiga agmara wakhti go'an. Waxaa sidoo kale la barayaa noocyo garaafyo kala duwan oo ay ku jiraan garaafyada gudban, garaafyada layka iyo garaafyada qaybta (pie). Waa muhiim inay carruurta ogaadaan sidii loo sharxi lahaa garaafka iyo inay awoodaan inay gartaan garaafku inuu macluumaadka si khalad ah u meteli karo.


Maxaad ku sameyn kartaa guriga?

- Cabir dhererka ama culeyska ilmahaaga daba galna isbedelka garaafka ku dhaca ilaa wakhti.





- Wakhtiga xigga ee aad ku aragto garaaf wargeyska ee ku saabsan mawduuc laga yaabo inuu xiiso geliyo ilmahaaga, wada fadhiista iskuna daya inaad turjuntaan. Wada shaqeeya si aan uga jawaabtaan su'aalaha sida: *Muxuu inoo sheegayaa garaafkani? Sidee baan ku ogaaneynaa inuu macluumaadku run yahay iyo in kale? May jirtaa si ka duwan oo macluumaadkan oo meteli karo ama loo sheegi karo? Miyey jiraan waxaadan fahmin?*



- Tus ilmahaaga biilasha guriga oo leh garaafyo, sida biyaha ama xisaabta korontada weydiina su'aalo sida, *intee in le'eg oo biyo ah oo ka badan ama ka yar ayaan isticmaalney marka loo eego biilkii ugu danbeeyey? Sidee baan u beekhaamin karnaa biyo badan? Intee in le'eg ayaad u maleynaysaa inuu hoos u dhacayo isticmaalka biyaheenu haddii aan taas sameyno? Biyo intee le'eg ayaad u maleynaysaa inaan beekhaamin karnaa?*
- Adigoo la jira ilmahaaga, la socda wakhtiga isaga/iyadu ay ku lumiyaan daawashada telefishinka. Toddobaadka dhammaadkiisa, bal eega inaad idinkoo wada jira aad sameyn kartaan garaaf si aad u muujisaan wakhtiga aad ku lumiseen.
- Ciyaaro ciyaaro sida Maqaska, warqada, la rux ilmahaaga isticmaalna calaamadaha wax lagu tiriyo si aad u diiwaangeliyo inta jeer aad guuleysato ama aad guuldareysato.
- Adoo la jira ilmahaaga, akhri kana hadal macluumaadka ku muujisan jadwalka tartanka cayaaraha.
- Akhri buuggagta macluumaadka ilmahaaga kalana hadal jadwalka iyo garaafyada ka muuqda iyaga.
- Tus ilmahaaga sidii uu u meeleyn lahaa oo uu u isticmaali lahaa jadwalka tasmada buugga.
- Sawir jadwalka nashaadyada uu ilmahaagu dhameystiro toddobaadka inta lagu jiro sida tababarka cayaaraha, musiga ama casharada dabaasha, heesaha guriga ama wakhtiyada khaaska ah inta lagu jiro toddobaadka dugsiga sida maktabada, kumbiyuutarada, cayaaraha dugsiga iyo bangiga.

